



SHARCIGA DHISMAHA SHIRKAD SHIDAAL

(GALAD PETROLEUM)

MUQDISHO -SOOMAALIYA

2022



**UJEEDDO:DHISMO SHIRKAD SHIDAAL MAS'UULIYADEEDU XADIDDAN TAHAY,
OO LAGU MAGACAABO (GALAD PETROLEUM)**

Maanta oo ay taariikhdu tahay **12/05/2022** Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**,lehna Xafiiska NootaayahaTayo Public Notary ee ku yaalla Xamar,degmada H/Wadaag Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheynta ee Magaalada Muqdisho,waxaa xafiiska iigu yimid mudanaha Hoos Ku Xusan:-

1- Cabdulwadud Xuseen Axmed, Sita baasaboorka lambarkiisu yahay P00897655, kuna lifaaqan Dukumintigaan.

Mudanaha kor ku xusan isagoo caafimaad qaba, caqligiisa taam yahay, cid heshiiskaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, wuxu i weediistay inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo Shirkad Shidaal oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

QODOBKA 1-AAD

MAGACA GALAD PETROLEUM

Mudanaha aan kor ku soo sheegay wuxuu sameystay Sharci Shirkad Shidaal lagu magacaabo (GALAD PETROLEUM) oo ah Shirkad Shidaal gaar loo leeyahay (Private Company).

QODOBKA 2-AAD

WAQTIGA LA' AASAASAY SHIRKADA SHIDAALKA

Shirkada Shidaalka (GALAD PETROLEUM) waxaa la'aasaasay **12-05-2022**, waxaana lagu aasaasay Magaalada Muqdisho Caasimadda Soomaaliya.

QODOBKA 3-AAD

NOOCA SHIRKADA SHIDAALKA

Galad Petroleum waa Shirkad Shidaal Oo gaar loo leeyahay, waxaana ku soo biiri Kara Saamiley kadib markuu Saxiixo Maamulaha Guud ee Shirkada Shidaal.

QODOBKA 4-AAD

XARUNTA SHIRKADA SHIDAAL

Xarunta Shirkada Shidaal waa Muqdishu caasimadda Soomaaliya Degmada Xamar-Weyne –Waxda Tabeelaha, Xarumaha, Shirkada Shidaal waa la kordhin karaa markii loo baahdo waxaana lagala xiriirayaa maamulaha guud ee Shirkada Shidaal

QODOBKA 5-AAD

UJEEDDOOYINKA SHIRKADA SHIDAAL

- 1- ka Ganacsiga Shidaal Nuucyihiisa kala Duwan
- 2- ka Ganacsiga Shidaal Jumlo iyo Tafaariiq.



QODOBKA 6-AAD

RAASIMAALKA SHIRKADA SHIDAAL

Raasumaalka Shirkada Shidaal waa lacag dhan US \$20,000 (Labaatan kun oo doolarka Mareykanka ah).

| No. | Magaca Milkiilaha | Lacagta | Saamiga |
|------------|--------------------------|----------------|----------------|
| 1 | Cabdulwadud Xuseen Axmed | \$ 20,000 | 100 % |

QODOBKA 7-AAD

GADASHADA SAAMIGA

Marka Uu ku soo biiro Saamile kale waxaa uu xaq u leeyahay in uu gato saamigiisa marku rabo waana inuu u gudbiyaa Milkiilaha Ee Shirkada Shidaal iyadoo qoraal ah, haddii looga gadan waayo muddo 90 maalmood ah, wuxuu u madax banaan yahay in uu ka gato cidduu rabo. Saamiyada waa la kordhin karaa haddii loo baahdo saamiga islamarkaana saamile kasta waxaa uu xaq uleeyahay inuu kordhin karo saamigiisa .

QODOBKA 8-AAD

QAYBSASHADA FAA'IIDADA IYO KHASAARAHA

Faa'iidada iyo khasaara wixii yimaado waxaa iska leh dhamaan Milkiilaha, iyo Saamileeda.

QODOBKA 9-AAD

SHAKHSIYADDA QAANUUNIGA EE SHIRKADA SHIDAAL

Shirkada Shidaal wuxuu leedahay xuquuq qaanuuni ah, haddaba Magaca Shirkada Shidaal ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida Shirkada Shidaal sida: Shidaalka Nucyihiisa kala duwan, sumadaha Shirkada Shidaal iyo tiimbarayaasha.

QODOBKA 10-AAD

QAAB DHISMEEDKA IYO MAAMULKA SHIRKADA SHIDAAL

Cabdulwadud Xuseen Axmed
Maamulaha Guud & Milkiilaha

QODOBKA 11-AAD

AWOODAHA MAAMULKA SHIRKADA SHIDAAL

Awoodaha Maamulaha Guud Ee Shirkada Shidaal.

- 1- Waa matalaha Shirkada Shidaal ee dhammaan heshiisyada ay Shirkada Shidaal galayso.
 - 2- Wuxuu siin karaa wakaalad guud ama mid gaar ah Cida Uu Doono
 - 3- Waa saxiixaha foomka kamid noqoshada Shirkada Shidaal
 - 4- dabagalka iyo kormeeridda dhammaan shaqooyinka Shirkada Shidaal
- FG. Waxaa akoonka lacagta ka bixin kara isaga Oo kali ah.**

QODOBKA 12-AAD

GEERI AMA WAALLI KU TIMAADDA MILKIILAHA

Haddii waalli ama geeri ku timaado milkiilaha Shirkada Shidaal waxaa saamigiisa lagu wareejiyaa dhaxaltooyadiisa sharciga ah ama ciddii kale ee maxkamadu u amarto.

QODOBKA 13-AAD

MUDDADA JIRITAANKA SHIRKADA SHIDAAL

Shirkada Shidaal wuxuu jirayaa muddo dhan 50 sano, mudada jiritaanka Shirkada Shidaal wa la kordhin karaa hadduu Uu golaado milkiilaha Shirkada Shidaal waana layareyn karaa.

QODOBKA 14-AAD

BAABI'INTA SHIRKADA SHIDAAL

Waxa Uu baaba'ayaa Shirkada Shidaal marka la helo qodobada soo socdo:-

1. Dhamaanshaha muddada jiritaanka Shirkada Shidaal.
2. Go'aan baabi'in ee ka soo baxo Milkiilayha.
3. Haddii Shirkada Shidaal musalafu Islamarkaana ay u suurta gali weyso inay shaqeeyso.
4. Haddii uu soo baxo sharci baabi'inay Shirkadaha Shidaal Ee noocaan ah.

QODOBKA 15-AAD

WIXII LAGA WAAYO SHARCIGA DHISMaha SHIRKADA SHIDAAL.

Wixii aan ku qornayn sharciga dhismaha Shirkada Shidaal waxaa loo raacayaa xeerka Shirkada Shidaal iyo sharciga Shirkadaha Shidaal ee dalka u degsan.

QODOBKA 16-AAD

DHAQAN GALKA SHARCIGA SHIRKADA SHIDAAL

Sharciga Shirkada Shidaal wuxuu dhaqangelayaa marka Uu saxiixo milkiilaha Shirkada Shidaal, wuxuna heshiiskan saxiixay, kadib markuu akhristay, raalina ka noqday sida aan u qoray heshiiskan, waana kan saxiixiisa hoos ku cad:-

CABDULWADUD XUSEEN AXMED

QODOBKA 17-AAD

TIRADDA BOGAGGA IYO QODOBADA HESHIISKAAN KA KOOBANAYAHAY

heshiiskan wuxuu ka koobanyahay 17-qodob iyo 4-bog.

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP.161/T.P.N/2022 Tr. 12/05/2022, Muqdisho, Aniga oo ah:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, lehna Xafiiska Nootaayaha Tayo, Waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkada Shidaal ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, islamarkaana Uu Saxiixay milkiilaha Shirkada Shidaal Nootaayaduna waxey hubisay magaca in ay yahay Kii dhabta ahaa Uuna leeyahay saxiixa kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.



SAXIIXA NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"

434927



LAMBAR BOONADA 027-0000071357

LACAGTA

100.00

**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU**

SHATIGA GANACSIGA

Business Permit

TAARIKH / Date 12-May-2022

SHATIGAAN WAXAA LA SHIYEY

This permit hereby is granted to

GALAD PETROLEUM

MAGACA GANACSIGA (Tradenam)

ABDULWADUD HUSSEIN AHMED

MAGACA MILKIILAHA / MAAMULAHA (Name of Owner / Manager)

WAXAA LOO OGOLAADAY OO KALIYA GANACSIGA HOOS KU XUSAN:

To operate and engage in the business/es of:

GANACSIGA KAALINTA SHIDAALKA(I GOD)

SHATIGAN WAXA LOO OGOL YAHAY OO
KALIYA CINWAANKA GOOBTA HOOS KU XUSAN

Business under this permit shall exclusively be
Conducted at the address indicated below:

Degmada/Deegaanka:

Xamarweyne

WAAXDA:

Hilaac

LAANTA:

N/A

TABEELAHA:

N/A

SHATIGAN WAXA UU DHACAYAA

This permit expires on the 12-May-2023

*Hada aadan ka run sheegin macluumaadka aad bixisay, ogsoonow in Shatiga dib lagaala noqon doono ivadoo waliba
sharciga lagula tiigsan doono.*



Duqa Magaalada ee Muqdisho

Mayor of Mogadishu

Cumar Maxamuud Maxamed

Cumar Maxamuud Maxamed

KOMBUYUUTAR SHATI
LAMBAR / Computer Serial No.

47777





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 12/05/2022

Aniga oo ah **Sayidcumar C/llaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/waduud Xuseen Axmed** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye **Galad Badroliyom** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 161/W.P.N/22, Tr. 12/05/2022**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

| | |
|------------------------------|------------------|
| Magaca Loo Caddeeyaha | Galad Badroliyom |
| Taariikhda Caddeynta | 12/05/2022 |

Wakiilka Loo Caddeeye: Aniga oo ah **C/waduud Xuseen Axmed**, Leh Tel No. **0615424965**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Waddani** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Galad Badroliyom**.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Sayidcumar C/llaahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/waduud Xuseen Axmed